

Wadahadal turjubaan la adeegsanayo

Tilmaamo yar

SOMALI



Integrerings- og mangfoldsdirektoratet

Marka laba kooxood doonayaan inay wada hadlaan, laakin aanay luuqad wadaagin, ayuu turjubaanku noqonayaa xubindhaxaad muhiim ah si ay labadan kooxood ugu suurtagasho inay wada hadlaan.

Ujeeddada wadahadalka la turjumay waa in wadahalkaasi sida ugu badan ee suurtagalka ah uu ugu ekaado wadahadal caadi ah. Inkastoo taasi jirto ayaa waxaa haddana cad in taxaddar dheeri ah lagaaga baahan yahay markaad dad la hadlayso adigoo turjubaan adeegsanaya.

Buuggan yari wuxuu si gaaban wax uga sheegayaa hawsha turjubaanka marka uu wax turjumayo iyo micnaha ay arrintani kuu samaynayso adiga turjubaanka adeegsanaya. Ugu danbaynta wuxuu buuggu carrabka ku dhufunayaa waxyaallo loo baahan yahay inaad si gaar ah uga taxaddarto markaad turjubaan adeegsanayso.

Hawsha turjubaanka

waxaa dejiya xeer-xirfadeedyada turjubaanka. Markuu turjubaanku hawshiisa gudanayo waxaa saaran xeerarkan guud ee la xiriira akhlaakhda turjubaanimada:

- Turjubaanku waa inuu turjumaa dhammaanba waxyaalaha lagu hadlo - oo aanu waxba ka tegin, wax ku darin ama ka beddelin.
- Turjubaanka waxaa looga baahan yahay inuu dhexdhexaad ahaado markuu wax turjumayo, fikraddiisa gaarka ahina waa inaysan turjumidda saamayn ku yeelan.
- Turjubaanku waa inaanu hawlo kale gelin inta turjumiddu socoto.
- Turjubaanka waxaa saaran waajib sirqarin oo buuxa

Waajibka sirqarinta ee buuxa ee turjubaanku wuxuu la micno yahay in

- waajibka sirqarintu khuseeyo dhammaanba warbixinna da uu turjubaanku ku ogaado shaqadiisa turjubaanimada
- waajibka sirqarintu khuseeyo "cid kasta", xataa turjubaanka madaxdiisa, dadka ay isla shaqeeyaan iyo qoyskiisaba.
- waajibka sirqarintu uu soconayo xataa marka turjubaanku shaqada ka tago

Qofka turjubaanka adeegsanaya waxay arrintani ula micno tahay in

- aad adigu mas'uul ka tahay dhammaanba waxyaalaha aad ku hadasho inta wadahadalku socdo
- aan turjubaanka mas'uul ka saarnayn in warbixinnada adiga iyo qofka aad wada hadlaysaan ay yihiin kuwo sax ah ama run ah
- aan turjubaanku xafidayn waxaad isku tiraahdeen, oo aanu "xasuustaadii" ahayn
- aan turjubaanku kuwa wadahadlaya midkoodna wakiil u noqon karin
- turjubaanku sheegayo markay ka reebban tahay inuu turjumo taas oo dhacda haddii turjubaanku
 - qaraabo la yahay, ay is-qabaan ama ay isu alkuman yihiin kooxaha qaar ka mid ah
 - uu laftigiisu arrinta qayb kaga jiro
 - ama uu arrinta wakiil uga noqday kooxaha midkood
- turjubaanku waa inuu sheegaa haddii uusan/ayasan turjumidda u fulin karin si wanaagsan

Markaad turjubaan adeegsanayso waxaa muhiim ah in la xusuusto

La hadal qofka aad wada hadlaysaan , ee isaga/iya-da ha ka hadlin.

- u jeeso dhinaca qofka aad wada hadlaysaan, ee ha ku jee-san turjubaanka Taas oo laga wado, ha oran "ii weyddii in uu yeelayo...", ee toos u weyddii oo dheh "ma yeelaysaa..." Sidaas ayuu turjubaanku turjumayaa, wadahalalkii la turju-mayna wuxuu u ekaanayaa wadahalad caadi ah oo kale.
- haddii ay jiraan wax uu mugdi kaaga jiro, ama haddii aad ka shakisan tahay waxa uu qofkii aad wada hadlayseen fah-may – weyddii qofka aad wada hadlaysaan, turjubaanka ayaa su'aashaada turjumi doonee.

Qorshee waxa aad doonayso inaad tiraahdo

- culayska saar qodobbada muhiimka kuu ah
- si kooban u hadal, oo turjubaanka sii fursad uu wax ku turjumo. Markaas ayey turjumiddu sida ugu saxsan u dhacaysaa, qofka aad wada hadlaysaanna uu helayaa fursad uu jawaabihiisa ama faallooyinkiisa ku dhiibto – sida marka dadku caadi u wada had-layaan dhacdaba.
- si cad oo qeexan bareerahaaga u dhiibo. Haddii aad maahmaah isticmaashid oo kale, waa inaad islamarkaana sheektaa waxa aad uga dan leedahay.

Ogow in:

- **calaamadda wejiga iyo baaqa jirka** oo marka caadi loo wada hadlaya micno sameeya kaaliyana ereya-da laysku oranayo, ay hoos u dhacayso saamaynta ay ku yeelanayaan wadahalad la turjumay. In la wada-hadlo ayadoo turjubaan la adeegsanayo waxay sidaas darteed u yara dhigantaa marka teleefoon lagu wada hadlayo oo kale – halkaas oo waxa keliya ee aan haysanno ay yihiin ereyada iyo codka.
- waxaa kaloo jira in **dhaqdhaqaaajinta xubnaha** qaarkood ay micnayaal kala duwan ku kala leeyihiin dhaqammada kala duwan (tusaale ahaan, madaxruxista oo noorwiijiga "haa" ku ah, waxay meelaha kale ku noqon kartaa "maya"). Waxyaalaha caynkan ah waa inaad xusuusataa markaad turjubaan adeegsanayso.
- **Turjumiddu waa shaqo adag.** Turjubaanku waa inuu si buuxdo ugu jeesto turjimiddu, shaqooyin kale oo aan taas luuqadda ahaynna ma qaban karo. Waxaa kaloo jirta in turju-baanku adinka wada-hadlaya hortiin daalayo, taas awgeedna uu nasasho u baahan doono inta uu hawsha ku jiro.

Denne brosjyren finnes også på følgende språk:
albansk, arabisk, engelsk, fransk, kurdisk,
russisk, serbokroatisk, norsk, spansk, tamil,
tyrkisk, urdu



Integrerings- og mangfoldsdirektoratet

IMDi Øst

Fylkene Østfold, Vestfold,
Akershus og Oslo
Postboks 8059 Dep
0031 OSLO
Telefon 24 16 88 00
Telefaks 24 16 88 31

IMDi Indre Østland

Fylkene Hedmark,
Oppland og Buskerud
Postboks 1253,
2806 GJØVIK
Telefon 24 16 88 00
Telefaks 61 17 08 95

IMDi Sør

Fylkene Telemark,
Aust-Agder og Vest-Agder
Postboks 647,

4666 KRISTIANSAND

Telefon 24 16 88 00
Telefaks 38 02 04 80

IMDi Vest

Fylkene Rogaland, Hordaland og Sogn og Fjordane
Postboks 4048 Dreggen,
5835 BERGEN
Telefon 24 16 88 00
Telefaks 55 30 09 88

IMDi Midt-Norge

Fylkene Møre og Romsdal,
Sør- og Nord-Trøndelag
IMDi Midt-Norge,
7005 TRONDHEIM
Telefon 24 16 88 00
Telefaks 73 89 24 31

IMDi Nord

Fylkene Nordland,
Troms og Finnmark
Postboks 83,
8502 NARVIK
Telefon 24 16 88 00
Telefax 76 96 58 38

Integrerings- og mangfoldsdirektoratet

Postboks 8059 Dep.
N-0031 Oslo

Kontoradr.:
Hausmannsgt 23
Tlf: (+47) 24 16 88 00
Faks: (+47) 24 16 88 01
www.imdi.no
E-post: imdi@imdi.no